SERVICESTYRELSEN

Caruurtu waxay afka ka barataan **waalidkooda**

Marka ay caruurtu afka ku adeegsanayaan ciyaaraha iyo kulamada kale ee ay la yeeshaan caruuraha kale iyo waaweynka ayay u hawlgalaan in ay afka u adeegsadaan si ujeedo leh, halabuurid ah oo hubaal ah – afku isaga ayaa is wada. Si kastaba ha ahaatee waxay caruurtu afka ugu horayn ka bartaan dadka waaweyn. Waxay is baraan afka, ay ka maqlaan dadka waaweyn oo adeegsanaya – waa erayada iyo odhaahaha muujinaya afka qoysas kasta –oo waxay is baraan habka ay dadka waaweyni u adeegsanayaan afka, marka ay wada hadlayaan, iyo marka ay ka hadlayaan dhacdooyinka iyo waayoaragnimada nolosha. Sidaa darteed waa muhiim in loo feejignaado, in ay dhamaan dadka waaweyni yihiin hormoodada afka, hase yeeshee waalidiin ahaan waxa joogtaan meel aad ugu muhiim ah horumarinta afka ilmihiina.

Waalidku waa hormoodada afka

Siyaabaha ay caruurtu afka u bartaan waxa ka mid ah, iyaga oo jila habaka ay waalidkoodu u adeegsadaan afka. Halkaas oo uu ilmaha yari ugu baahan yahay, in uu jili karo erayada iyo odhaahaha oo uu barto habka ay dadka waaweyni afka ugu taageerayaan jidhkuhadalka, wejikumuujinta iyo farokuhadalka, oo uu ilmaha yar rooni u baahan yahay in uu taageero u helo in la badiyo erayadiisa, habka uu u dhisan yahay naxwaha afku oo muuqda iyo suurtagalada adeegsigooda. Waxyaabaha ay tahay inuu ilmuhu barto waxa ka mid ah, in uu eraygu yeelan karo micnayaal badan (at bakke 'gadaal u wad baabuur', en bakke på vejen 'barxad', en bakke jordbær 'sinxi' iwm.), in la adeegsado micnewadaagta (en seng 'sariir' waxa kale oo la odhan karaa en kane ' sariir', en køje 'sariir', et leje 'sariir' iwm.) oo waa in uu bartaa in uu adeegsado oo fahmo sarbeebta iyo kaftanka.

Haddii aad tihiin waalidiinta waxa tihiin furaha kaalinta hormoodka caruurtiina, sababta oo ah waxa tihiin dadka weheliya caruurtiina saacadaha ugu badan habeen iyo dharaar, oo waxa tihiin dadka uu ilmuhu la leeyahay xidhiidhada dareen ee ugu dhow. Waxa idiin suurtogasha in aad ilmihiina maalin kasta kala hadashaan arimo badan oo kala duduwan. Tusaale ahaan waxa si joogto ah loogu fulinayaa subxaha, marka uu ilmihiinu tooso, quraacanayo, lebisanayo iwm. Arimahaas joogtada ahi waxay suurtogelinayaan soo noqnoqosho lagu magacdhebo walax dhab ah oo la xidhiidha soonoqnoqdayaashaas. Waxa laga sheekaysan karaa , sida hore loogu kacay, siduu ilmuhu u seexday, waxa uu ilmuhu ku riyooday, oo waxa laga sheekaysan karaa dharka ku haboon hawlaha maalintaas iyo cimilada. Lebisqaadashadu waa fursad qaali ah si loogu celceliyo magacyada gaarka ah ee walxaha lebiska oo laga hadlo fahanka sare iyo hoose (lebisku wuxuu noqon karaa dharka hoose, dharka sare, dharka hurdada, sharabaadada iyo surwaalka iwm.) iyo jidhka, midabada iyo jahooyinka. Aad bay waxkuool u tahay, in aad u feejignaataan, in uu ilmuhu si firfircoon uga qaybqaato wadahadalka –waa muhiim, in aad ilmaha la sheegaysataan ee maaha in aad idinkuun ilmaha la hadashaan. Wadahadalku wuxuu waxtar weyn u leeyahay, in ay ilmaha u suurtogasho in uu hore u mariyo erayo kala duduwan oo noqdo mid waayoaragnimo bulsheed ku leh afka.

Haddii ay idinla tahay, in ay hawl badan tahay ama aad dejisaan in aad ilmihiina la yeelataan wadahadal, waxa fekrad wacan noqon karta in aad kala hadashaan tababaraha xanaanada caruurta, sida u noqon kartaan hormooddo af oo xoog ah, iyo sida u abuuri kartaan arimo sameeya xidhiidh iyo waayoaragnimo, oo hawlgala oo dhiirigeliya suurtagalada in uu ilmuhu helo waayoaragnimo af.

SPROG PAKKEN
praksis der gør en forskel

Waxa tixgelin leh in la helo caruur aan u jajabnayn xidhiidhka af ahaaneed ee kulanka oo barta ay xiiseeyaan ku sugnaada muddo dheer. Caruurtaasu waxay si gaar ah ugu nuglaan karaan arimo xayiraya xidhiidhka, tusaale ahaan aan waayoaragnimo la'aan maqal ama kulan. Waxa halkaa waalidiinta iyo tababarayaashaba u yaala hawl gaar ah.

Wadahadalka waalidiinta iyo caruurta

Barbilowga wanaagsani waa, inuu ilmuhu ugu horayn si firfircoon uga qaybgalaa wadahadalka. Waxa la leeyahay, waa in aad ilmihiina maalin kasta ku dhiirigelisaan oo aad ku loolansiisaan wadahadalka. Arintaas inta badan waxa lagu qabtaa, idinka oo dhegaysta ilmuhu, waxa uu niyadda ku hayo oo ka taageera wadahadalka, idinka oo waydiinaya waxa uu xiisaha u leeyahay oo u balbalaadhinaya suaalaha sheekocaruureedda.

Waxa jira tiro qorshayaal taageero af oo la diyaariyay, kuwaas oo idinka iyo ilmihiinaba u adeegsan kartaan faaido ahaan.

1. Adeegso suaalaha furan

Waydiiya ilmaha suaalaha aan lagaga jawaabi karin haa ama maya. Suaalaha furani inta badan waxay ka bilaabmaan kuma, maxay iyo halkee.

Tusaale ahaan: "Halkee baad u malaynaysaa, inay hadda duulayso xayawaanka yar ee 'mariehønen'?"

"Maxay ahayd wixii ugu xiisaha badnaa, markii aad Søren la joogtay qolka barkimooyinka (puderummet)?

2. La soco xiisaha ilmaha

Marka uu ilmuhu xiiso u muujiyo tusaale ahaan hablo ilma boqor, Nincaareed, cagafcagaf ama xayawaanka yar ee 'mriehøne', uu markaa isha la helay, waa in aad kala sheekaysataan, waxaas uu ku shababan yahay. La socoshada xiisaha ilmaha, waxa talaabo talaabo u fidinaysaan oo hore ugu marinaysaan tusmada wadahadalka, halkaas oo erayo cusub iyo fekrado cusubi imanayaan. Arintu waxay ka soconaysaa waxyaabaha la hubo oo waxay u dhaqaaqaysaa waxyaabaha qarsoon, sidaas ayuu ilmuhu ku balaadhinayaa awooderayeedkiisa iyo waayoaragnimadiisa duniyeed iyo in awooddiisa in uu kala saaro waxyaabahaas.

3. Sug jawaabta ilmaha



Sii ilmaha wakhti uu ku jawaabo! Waxa Laga yaabaa in uu ilmuhu u baahan yahay wakhti yar oo uu ku helo erayga uu adeegsan lahaa si uu u jawaabi karo, ama laga yaabee in uu ilmuhu u baahan yahay wakhti yar oo uu suaasha ku fahmo. Marka aad ilmaha siisaan wakhti ee aad sugtaan, in uu ilmuhu helo erayada oo uu dhiso weedhaha, ayaa uu halkaa ka dhacaya geedisocodka barashadu, halkaas oo ay u dhismayso in uu rumaysto, in ku libaystay loolamada afka.

SPROG PAKKEN
praksis der gør en forskel

4. Turjun oo sii wad, waxa ilmuhu yidhaahdo

Sii wad waxa ilmuhu yidhaaho. Waa wax aan laga maarmi karin, in ilmaha laga taageero in uu helo erayada saxa ah iyo odhaaho, ka dibna uu si cad u sheegi karo.

Tusaale: wiil 3-jir ah: ”Waxa halkaas yaala, sudhan qaboojiya-hayga?”.

Waayeel: ”Ma waxaad u jeedaa kabadh dushii?”

Wiil: ”Maay, waxaa ay xaashiyuhu sudhan yihiin”.

Waayeel: ”Haaa, sabuuradda wargelinta – sawirkaaga wacan ee sudhan sabuuradda wargelinta ee dhinaca qaboojiyahaaga.”

5. Ka caawi ilmaha in uu adeegsado erayada

Marar badan baa lagu celceliyaa eray keliya oo lagu isticmaalaa habab kala gedisan ka dibna wuxuu ilmuhu bartaa micnayaasha erayga ee kala gedisan iyo suurtagalada adeegsiga. Marka walax iyo arin lagu magacdhebo agagaarka ilmaha ayuu ilmuhu ku bartaa erayada cusub oo uu halkaas erayadaas iyo fahamada qunyar ku darsan karo afkiisa.

Tusaale:

Qofka ayaa Bamse yar ku qarin kara meel aan loo filayn, waana la is kala beddelayaa si loo sheego, meesha uu Bamsuhu yaal. Tusaale ahaan, Bamsuhu wuxuu yaal daaradda, musqusha ama wuxu ku jiraa khaanadda sadexaad ee madbakhkha. Ka dib ilmaha ayaa qarinaya Bamsaha oo sheegaya, halka uu qofka weyni ka raadinayo Bamsaha.

6. Sharax erayada aanu ilmuhu aqoonin

Dhamaan caruurtu waxa u baahan yihiin in sharax u helaan erayada cusub iyo fahamada. Caruurtu waxay u baahan yihiin, in sharax u helaan eray kasta oo uu ilmaha micne u sameeyo. Kala hadal ilmahaaga eray kasta sida tusaale ahaan khaanad, fireemka daaqadaha ama geerashka baabuurka (qolbaabuur) si aad u hubsato, in uu ilmuhu bartay erayga oo uu fahmay micnihiisa.

Cilmibaadhis ayaa muujisa, in habkan soo socda oo ilmaha erayga loogu sharxaa si gaar ah u yahay meelmar:

- Adeegso eray kale oo micno ahaan u dhigma
- Adeegso farokuhadal ama cod si loo muujiyo micnaha erayga
- U adeegso erayga isku xidh kale
- Farta ku fiiq muujiyayaal la halmaala erayga
- Hawlgeli walax dhab ah si uu ilmuhu u helo eray arag ah

7. Relate to something which is familiar to the child

Waayoaragnimada qofeed ee ilmaha ka hawlgeli wadahadalka. Qaababka, midabbada iyo tirada walxaha uu ilmuhu hore

magacyadooda u yaqaanay iyo hawlaha hore uu yaqaanay ayaa faaido weyn u leh.

Tusaale: ”Maxa xasuusan kartaa, markii aynu baska la soconay ee aynu ag marnay fiiqii dheeraa (tårn)?”

”Maalintii aynu joognay bacadlaha ee aad tijaabisay wareegga ee aad kilinkilaysay caloosha…”.

8. Isticmaal tabaha afka ee uu ilmuhu yaqaanno:

Ilmaha ka taageer in uu sameeyo sheekooyinka gaagaaban, halkaas oo uu ilmuhu adeegsanayo waayoaragnimadiisa iyo tabihiisa afeed. Waxay noqon karaan sheekooyin ku saabsan ilmaha laftiisa, waxa wanaagsanaan karta sheekoxariirada (løgnehistorier) oo waxay noqon kartaa sheekooyinka maloawaalka ah ee ku saabsan budhcadbadeedda iyo hablaha qoobkaciyaarka. Waxaad ilmaha ku taageeri kartaa xiisaha sheekooyinka adiga oo dhegaysta oo suaalo xiiso leh ka waydiiya sheekada.

9. Toos ha u tilmaamin khaladka ilmaha

Waxa uu qof ku toosin karaa ilmaha in uu hab hufan ugu celceliyo weedhdhaas iyo suurtagal ahaan in loo fidiyo sida ku faahfaahsan qodobka 4’aad. Marka uu ilmuhu u bilaabo hadalka xilliga dheer, ayay waxaasi guud ahaan u caawinayaan si buuxda, haddii hadalka oo dhan hab sax ah loogu celceliyo oo la iska jiro in hadalka ilmaha la fududeeyo.

10. Afka kula ciyaar, marka ay suurtagasho



Had iyo jeer ilmaha kula ciyaar luqadda, si aad wax xiiso leh ugu dhigto in uu barto erayada cusub iyo weedhaha. Ilmuhu wuxuu si dhaqso ah u helayaa suurtagalada cusub, oo dhiirrismaya marka afka loo adeegsado si kedis ah.Tusaale ahaan akhri sheeko uu ilmuhu jecel yahay, hase yeeshee jilayaasha u bixi magacyo kale ama bedel dhacdada, dabeedna ilmuhu wuu yaabayaa, hadana wuu ka helayaa, wuu ka hor imanayaa oo wuxuu saxayaa khaladkaaga.

Wadahadalada nololmaalmeedka

Si ay idiinku suurtagasho in aad ilmaha kala sheekaysataan wixii uu ku shababnaa intii uu maalintaa ku sugnaa xanaanada caruurta, waxa lagamamaarmaan ah in tababarayaashu ku fiican yihiin in ay idinku wargeliyaan moduuca guud ee la qabanayo iyo waxa hubaal ahaan dhacay maalintaa.

Xarumaha qaarkood ayaa sawiro ka qaada hawlgalada caruurta ee maalintaas oo waaliidiinta u ah warbixin joogto ah. Waxay waalidiinta u suurtogelinayaan in ay ilmaha la daawadaan sawiradaas oo uu ilmuhu ka sheegeeyo waxa uu laftiisu sameeyay. Sawiradaasi waxay idiin suurtogelinayaan in aad mar dambe dib ugu noqotaan waxa dhacay oo aad suaalo la taaban karo weydiisaan ilmaha ”Waxaan arkay in aad xariijin jid ka samayseen sanduuqa xiidda dhexdeeda, sideed u samayseen?” ”Maxaad samaysay adigu?” iwm,

Kala hadala xarunmaalmeedkiina, idinka oo kaashanaya tababarayaasha sida aad u abuuri kartaan deegaano taageera afka oo ku dhisan baahidiina iyo shuruudihiina.

Qiimaynta afka

Qiimaynta afka awgeed waa shuruud dabeeci ah, in aad ka hawlgashaan ka hor iyo ka dib qaadista qiimaynta. Haddii ay tababarayaashu qabaan, in ay haboon tahay in la qiimeeyo afka ilmaha, waxa waajib idinku ah in aad ilmihiina u ogolaataan qiimaynta afka. Qiimaynta afka ka dib waxa la idin siinayaa goaanka, dabeedna idinka iyo tababarayaasha ayaa heli kara sida ugu suurtagalka fiican ee aad afka uga taageeraysaan ilmihiina. Waxay noqon kartaa, in aad guriga ugu akhridaan buugaagta, kuwo ku haboon mowduucyada lagaga shaqeeyo xanaanada caruurta, ma waxay noqon kartaa, in aad ugu feejignaataan taageerayaasha qorshaha afka ee kor ku magacaaban. Sidaa oo kale waxay noqon kartaa, in aad heshaan erayo si dhab ah loo xulay oo uu ilmihiino ugu baahan yahay in uu kaga faaidaysto hawlgalada ka dhacaya xanaanada caruurta.

Akhriska wadahadaleed

Halkii berigii hore carruurta kor wax loogu akhriyi jiray, ee ay dhegaysan jireen uun, akhris wadahadaleedku wuxu ka dhigan yahay, in qofka wayni wax ugu akhriyo qaab ay hadallo is waydaarsanayaan carruurta. In suaalo la waydiiyo carruurta oo la godlo, iyadoo wax loo akhriyo ayaa dhiirrigelisa, taasoo horseeda in carruurtu horumariyaan qaybo badan oo afka ah.

Akhris wadahadaleedka waxa loo qaybin karaa saddex qaybood, oo kala ah: akhriska hortii, akhriska dhexdiisa iyo akhriska dabadii:

Akhriska ka hor

- Akhri buugga ka hor inta aanad u akhriyin ilmahaaga oo ka qaado fikrad, waxyaabaha aad rabto inaad kala hadasho iyo waxaad ka waydiinayso sheekada.
- Ka dhig wax akhriska mid deggan oo gaar ah.
- Wax uga sheeg ilmaha buugga: tus bogga hore iyo bogga danbe una sheeg cidda qortay buugga iyo cidda samaysay sawirrada.
- Suaalo ka waydii ilmaha muuqaalka buugga.
- Ilmahaagu ha ku fadhiisto wax yar oo ahmiyad gaar ah u leh sheekada.

Akhriska dhexdiisa

- Markasta u diyaar ahow suaal, intaad buugga akhriyayso. Marka ilmahaagu ku waydiiyo suaal, jooji akhriska oo u jawaab.
- La soco laabraaca ilmahaaga (nysgerrighed), ku dhowow, waydii wuxu xiisaynayo oo dhegayso jawaabaha. Uga gur ilmahaaga sidii sheekeeye.
- Ku celinta akhriska, tus buugga oo ku dhiirrigeli ilmahaagu, inuu ka sheekeeyo wuxu ka xusuusan karo, sida tusaale ahaan sawirrada. Ku biiri aqoon cusub wuxu yaqaan ilmahaagu.
- Ku celinta akhriska: ku dhiirigeli ilmahaagu in uu ka sheekeeyo ilmo uu xasuusan karo, tusaale ahaan mid uu sawirada kala soo baxay. Ka caawi ilmaha in uu erayeeyo sheekada, haddii uu xasuusan kari waayo erayada saxa ah iyo odhaahaha. Sharax erayada aanu ilmuhu hore u aqoonin oo aqoon cusub ku dar aqoonta ilmahaaga.

Akhriska dabadii

- Ka hadal dulucda sheekada sidoo kale markaad laabto buugga. Adeegso ereyada cusub, ee ku jira buugga – marba markay sii bataan ereyada uu maqlayo ilmahaagu, waxa sii badanaya sidu u xusuusanayo ee isaguna u isticmaalayo.

Dooro buugaagta uu ilmahaagu ku shababan yahay, ama uu yaqaano, ama buugaagta wadata erayada aad u qiyaastay, in uu ilmuhu si gaar ah ugu baahan yahay in uu barto. Buugaagta u eeg in ay si gaar ugu haboon yihiin akhriska hadalisweydaarsiga:

- leh sawirada midabaysan oo caawiya fahanka
- leh dherer haboon
- sheegaya sheeko baralay (fiktiv historie)
- ka kooban tusmo ku haboon ilmaha da'diisa

Waxa fiican in aad xilliyo gaagaaban ilmaha u akhrido sadex-afar jeer buugaag isku mid ah, adiga oo kaashanaya habka akhriska hadaliswaydaarsiga iyo tixgelinta qorshayaasha af taageeraha afka.

References:

Bleses, Dorthe (2010): Barnets første lærer bor derhjemme, Læsepædagogen nr. 4.

Bylander, Helle & Thomsen, Inge Benn (2008): Sprog og leg. Herning: Specialpædagogisk forlag

Boye, Connie & Kirsten Rasmussen (2011): Små børns sprog og læsning – fra nul til syv år. København: Akademisk forlag

Further inspiration for parents is available at the Sprogpakken website: www.sprogpakken.dk